



**CROSSROADS ELEMENTARY**  
**Science + Montessori Programs**

## **XAASHIDA XAQIIQADA: KALANDARKA SANADKA DHAN**

Kalandarka sanadka dhan ee Crossroads waxaa loogu talagalay inuu ardayda u caawiyo tacliin ahaan isagoo siinaya fursado waxbarasho oo joogta ah iyada oo la kordhinayo sannad dugsiyeedka illaa bilaha saamarka iyo yeelashada fasaxyo gaa-gaaban sanadka oo dhan. Hase yeeshee, xogta ayaa muujineysa in habkan sanadka oo dhan ah uusan ardayda dhigata Crossroads ka caawineynin inay la yimaadaan waxqabad fiican tacliin ahaan oo uusan yareyneynin luminta waxbarashada saamarka.

Sababaha hoos ku taxan dartood, xagaagani, **hoggaanka SPPS waxay kula talin doonaan Guddiga Waxbarashada in Dugsiga Hoose ee Crossroads uu u wareego kalandar-dugsiyeedka caadiga ah laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2025-26**. Sannad dugsiyeedkan 2024-25 ee soo socda ayaa noqonaya kii ugu dambeeyey ee jadwalka sannadka oo dhan ah ee iskuulka Crossroads. **U wareegitaanka kalandar-dugsiyeedka caadiga ah, barnaamijyada labadaba Sayniska iyo Montessori ayaa laga sii wadi doonaa iskuulka Crossroads.**

## **SABABAHA LOOGU BEDDELAYO KALANDAR-DUGSIYEEDKA CAADIGA AH**

### **1. Natiijooyinka ardayga kuma hagaagin kalandarka sanadka oo dhan ah:**

- a. **Waxaa hooseeya natiijooyinka tacliinta ee ardayga:** Dhinaca akhriska, xisaabta iyo sayniska, ardayda Crossroads waa kuwo, inta badan, ka hooseeya degmada inkastoo la balaariyay fursadaha waxbarasho ee lagu bixiyo Waxbaridda Xilliga Fasaxa.
- b. **Waxaa hooseeya soo xaadiriinta ardayda:** Xogtu waxay muujineysaa in ardayda Crossroads ay ku dhibtoonayaan inay si joogta ah u soo xaadiraan (90% ama kabadan) marka loo barbardhigo dhigooda dhigta iskuullada kale, taasoo hooseysa bilaha xagaaga.
- c. **Arday tiro badan oo isaga baxa Crossroads xilliga saamarka:** Waxaa jiray qaab ardayda oo isaga baxayay saamarka oo aanay dib ugu soo laaban Crossroads. Qaabkan oo isla iskuulki aan lagu noqon xilliga deyrta ayaa ka sarreeya degmada inteeda kale.

### **2. Gabaabsiga shaqaalaha Waxbaridda Xilliga Fasaxa:** Marka Crossroads uu fasax yahay, Waxbaridda Xilliga Fasaxa ayaa la siiyaa ardayda K-5 ee ubaahan kara taageero tacliin oo dheeraad ah. Waxaa jira caqabado badan oo ka jira sidii shaqaale buuxa loogu heli lahaa waxbaridda xilliga fasaxa, taasoo ku saleysan isxilqaan.

Shaqaalaha ruqsadda haysta ee Crossroads ayaa laga yaabaa in aanay rabin in ay shaqeeyaan maalmahan dheeraadka ah ee sida rasmiga ah ay fasaxa u yihiin, halka shaqaalaha kale ee SPPS aan la heli karin inay buuxiyaan maadaama ay ku jiraan kalandarka caadiga ah ayna horay uga sii shaqeynayaan iskuuladooda.

Macalimiin la'aantu waxay ka dhigan tahay in aanay jirin waxbarid ku filan xilliga fasaxa oo furan oo loo heli karo ardayda. Bishii Nofeembar 2023 oo kaliya, shaqaale yaraan awgeed, iskuulka Crossroads ayey noqotay inuu diido in kabadan 100 arday ah oo codsaday waxbaridda xilliga fasaxa.

- 3. Carqaladeynta caadooyinka iyo hab-socodka fasalka:** Jadwalka sanadka oo dhan ah ee iskuulka Crossroads ayaa ka dhigan inuu leeyahay laban-laabka fasaxyada (6) sanadkii marka loo barbardhigo iskuullada la dhigto jadwalka caadiga ah (3 fasax). Bilaabista iyo joojinta iskuulka mararkan badan sanadkii ayaa adkeysa in la joogteeyo caadooyinka iyo hab-socodka fasalka ee gacanta ka geysta abuurista jawi nabdoon oo soodhweyn leh.
- 4. Caqabadaha lagu dhisayo laguna joogteynayo iskaashiyada dugsiga:** Maadaama ururada ku saleysan bulshada ay jadwalladoodu la jaanqaadaan jadwalka soojireenka ah ee iskuullada badankoodu leeyihiin, way adag tahay in la helo wax shuraako ah oo bixin kara fursado waxbarasho oo dheeri ah iyo barnaamijyo loogu talagalay ardayda Crossroads.

**WEYDIIMAHA:** Tracy Buhl, Maamulaha Crossroads, [tracy.buhl@spps.org](mailto:tracy.buhl@spps.org) Taleefanka Xafiiska: 651-744-6933, Taleefanka Gacanta: 612-946-0385.

**SAHANKA KALANDARKA:** Fadlan samee sahankan gaaban:  
Waxaad koodhkan QR ku iskaangareyn kartaa kaamirada taleefankaaga casriga ah ama booqo linkigan: [bit.ly/49DJ6Oy](https://bit.ly/49DJ6Oy)



MARKI UGU DAMBEYSAY EE LA CUSBOONEYSIIYAY: ABRIL 18, 2024